



Tobanka Su'aalood ee Inta Badan La Is Weydiyo ee ku saabsan daadguraynta iyo

Hoysiinta Degdegga ah

Xafiiska Maaraynta Xaaladaha Degdegga ah ee Anchorage

Ugu weyn: (907) 343-1400



Khadka Xaaladaha Degdegga ah: (907) 343-4701

www.muni.org/oem

1. Waa maxay khataraha ugu waaweyn ee goobta Anchorage ee laga yaabo inay u baahdaan daadgureyn ama hoysiin degdeg ah?

• **Dhulgariir aad u Daran:** Dhulgariiradu waa halista ugu daran oo joogtada ah ee Anchorage . Inkasta oo South Central Alaska si joogto ah uula kulanto dhulgariiryo yar yar, waxaa jira wax yar oo aan wax dhaawac ah lahayn. Si kastaba ha noqotee, dhulgariir aad u daran oo la mid ah kii la dareemay 1964 ayaa sababay waxyeelo wayn oo ku timaada kaabayaasha iyo dhismayaasha taasoo saameeyn ku yeelan karta qayb muhiim ah oo ka mid ah dadweynaha deegaanka.

<https://www.ready.gov/earthquakes>



• **Dab-wayn:** Anchorage waxaa lagu magacaabay bulsho khatar ugu jirto dab-wayn waxana ku magacaabay Waaxda Adeega Beeraha ee Maraykanka. Waxyaabaha keenaya khatarta waxaa ka mid ah geedaha adag ee isku dhafan iyo geedaha koniferka oo si fudud ugu guban kara xaaladaha khatarta dabka. Sidoo kale, xaafadaha deegaanka iyo xaafadaha miyiga ah waxay ku yaalaan dhammaan melaha duurka ah ee u nugul dabka-wayn ee xilliyeedka ah.

<https://www.ready.gov/wildfires>

• **Cimilo Daran:** Cimilada daran ee South Central Alaska waxay soo saari kartaa xaalado halis ah oo ay ku jiraan duufaan, dabayl xoog leh oo duufaan leh, baraf ballaaran, iyo fatahaad ama daadad daran. Intaa waxaa dheer, cimilada daran ee xilliga jiilaalka waxaa la xiriiri karaa baraf xoog leh, roobab barafobaya ama roob baraf wata, iyo heerkul aad u hooseeya.

• **Joojinta Adeega Tamarta:** Arqaladaha gaaska dabiiciga ah iyo go'ida koronto ee muddada yar ah ayaa sidoo kale abuurin kara xaalado loo baahanayo in loo dhiso Guryo Degdegga ah dadka deegaanka ee barakacay. Xaaladaha noocan badanaa waxay u xadidanyihiin si dabiici ahaan laakiin waxay noqon karaan kuwa baahsan.



Korontada Chugach

907-762-7888

<http://www.chugachelectric.com/>

ML&P - Karoontada iyo Iftiinka Degmada

907-279-7671

<https://www.mlandp.com/>

MEA – Ururka Korontada Matanuska.

907-696-7697

<http://www.mea.coop/>

ENSTAR

907-334-7788

<https://www.enstarnaturalgas.com/>

2. Sidee ayaan ku ogaan karaa xaaladaha halista ah ee deegaankayga?

• Kala soco warbaahinta maxaliga ah si aad u hesho macluumaad ku saabsan khatarta suurtoogalka ah oo saameeyn kara deegaanka aad ku nooshahay.

• Iska diiwaangali adeegga bilaashka ah ee NIXLE si aad u heshid la-talin iyo digniino ka timaad Hay'adaha Badbaadada Dadweynaha iimayl ahaan, farriimo qoraal ahaan, iyo warbaahinta kale ee bulshada. Waxaad si sahlan isugu diiwaan gelin kartaa NIXLE adoo fariin ugu diraya Zip Code-ka Anchorage-kaada 888-777. Waxaad sidoo kale geli kartaa NIXLE.com si aad u diiwaangaliso emailka iyo fariimaha qoraalka ah.



• Sii wad baaritaanka warbaahinta maxaliga ah iyo NIXLE ee macluumaad hada ah ee ku saabsan xaaladaha iyo wixii talooyin ah ee khaas ah marka lagu jiro xaalad deg-deg ah ama xaaladaha khatar ah ay soobaxaan.

• Waxaad sidoo kale waci kartaa 2-1-1, halka oo Wakiilada Wicitaanada ay heli doonaan macluumaad ku saabsan xaaladaha, tilmaamaha daadguraynta, iyo macluumaadka ku saabsan goobaha guryaha degdegga ah.

• Khadka Xaaladaha Degdegga Anchorage ee 907-343-4701 waxay bixisaa fariin horey loo duubay oo ah macluumaad iyo tilmaamo loogu talagalay dadka deggan deegaanka ay dhibaatudu saameysey.

- Shabakada Xafiiska Maaraynta Xaalada Degdega ah ee www.muni.org/oem sidoo kale waa goob wanaagsan oo laga helo macluumaadka hada jira iyo sidookale tilmaamaha.



3. Sideen ku ogaanayaa haddii ay tahay inaan guurayo?

- Saraakiisha Badbaadada Dadweynaha waxay isku dayi doonaan inay bixiyaan ogaysiis hordhac ah inti suurtagal ah ka hor inta aan loo baahanin dadgurayn toos ah. Mar kasta oo ay jirto khatar dhici karta (dabka duurka ama halis kale) Saraakiisha Booliska iyo Saraakiisha Badbaadada Dadweynaha ee kale ayaa si toos ah uso wargalin doonaan dadka dagan degaanka ay dhibaataadu saameysey. Waxay ku sameyn karaan tan ayagoo tagaya albaab illaa albaab, iyada oo loo marayo nidaamyada kulug leh wax usheegida dadwaynaha ama labadaba.

- La soco warbaahinta wararka ee maxaliga ah iyo NIXLE - waxay sidoo kale ku siin doonaan digniinta daadguraynta iyo digniinooyinka.

4. Sidee baan ku ogaanayaa waxa ay tahay wadada daadgureynta?

- Wadooyinka daadgureynta waxaa go'aamiya Saraakiisha Badbaadada Dadweynaha iyada oo ku saleysan xaaladaha iminka iyo xaaladaha la filayo iyo sidoo kale nooca khatarta dabiiciga ah ama khatarta. Dadaal kasta ayaa loo sameyn doonaa si loo siiyo dadka deggan wadada daad guraynta ah ee la filayo sida ugu dhakhsaha badan ka hor inta aan la amrin daadgureyn.

- Maskaxda ku hay in isbeddelka xaaladaha laga yaabo inay ubaahato isbeddel ku yimaada wadada daadgureynta si loo xaqiijiyo amaankaaga. Meelaha Xakamaynta Gaadiidka waxaa dejin doona Saraakiisha Booliska ee Anchorage si loo hubiyo in dadka deegaanka ay ku sii jiri karaan jidadka loo qoondeeyey. Fadlan raac tilmaamaha Saraakiisha Badbaadada Bulshada si loo hubiyo badbaadada.



5. Maxaa dhacaya haddii aanan haysan gaadiid ama aan u baahdo gargaar markaan guurayo?

- Khayraadka Gaadiidka Degmadu aay leedahay oo ka shaqeya ayaa loo isticmaali karaa inay taageeraan baahiyaha gaadiidka ee daadguraynta la amray haddii loo baahdo.
- Waxaa muhiim ah dadka deegaanka inay ogeeysiiyaan saraakiisha amniga dadweynaha marka koow lugula soo xiriir haddii aadan haysan gaadiid shaqsi ahaaneed si aad u gurto.
- Adeegyada gaadiidka ee Para-transit ayaa sidoo kale laga dhigi doona mid la heli karo oo loogu talagalay shakhsiyaadka leh baahida daran u baaha adeegga noocan oo kale.



6. Ka waran xayawaankayga?

- Marka laga reebo xubnaha qoyska, dadka deegaanka waa in ay lahaadan qorshe loogu daad-gureynayo xayawaanada gurigooda ama xayawaanka adeegga. Xayawaanada guryaha waxaa loo tixgeliyaa xayawaanada yar yar sida eeyada, bisadaha, ama xayawaanada la midka ah sida inta badan laga helo guryaha mulkiilayaasha xayawaanada.

- Xayawaanka guriga kuma jiraan xayawaannada qalaad ama khatarta ah sida masaska, daanyeerada, xoolaha ama xayawaanada beeraha, iyo xayawaanada duurjoogta ah ee lacarbiyay.
- Dadka deegaanka aan haysan gaadiidkooda gaarka ah ee loogu talagalay daad guraynta la amray, xayawaanada guryaha ayaa la socon kara mulkiilahooda gaadiidka ay bixisay degmada. Xayawaanka waa in ay kujiraan xakameynta wanaagsan ee mulkiilaha mar walba inta lagu jiro daadguraynta markaad raaceyso gaadiidka degmada.
- Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa Xafiiska Maraynta Xaaladda Degdega ah ee Anchorage oo ku saabsan waxa mulkiilayaasha qaybiyasha xayawaanada aay la imaanayaan daadguraynta

7. Kawarama sidoo kale fardaheyga iyo xoolaha kale?

- Degmada ma lahan dhaqaalaha ama awooda daadgureynta iyo xannaaneynta xoolaha ama xayawaanada beeraha inta lagu gudo jiro xaalad degdeg ah. Waa mas'uuliyadda mulkiilayaasha xayawaanada in ay xaqiijiyaan amniga iyo ladnaanta xoolahooda inta lagu gudo jiro xaalad degdeg ah.

- Mulkiilayaasha xayawaanada deegaanka ayaa lagu dhiirgelinayaa inay ku biiraan ama sameeyaan shabakadaha taageero wadaag ah si ay isku caawiyaan inta lagu gudo jiro xaaladaha degdegga ah iyo musiibooyinka.

- Mulkiilayaasha xoolaha waxaa lagu dhiirgelinayaa inay tixgaliyaan daadguraynta xayawaanadooda wakhti hore marka ay xaaladaha khatarta ah soo socdaan.





8. Halkee ayay ku yaalaan Guryaha Gurmada Degdegga ah?

- Saraakiisha Badbaadada Bulshada ayaa dadka kula talin doonaan ogaysiis hore sida suurtagalka ah goobta guryaha gurmada degdegga ah. Xarumaha guryaha gurmada degdegga ah waxaa laga yaabaa inay noqdaan dugsi, Xarun degmo, ama xarun gaar loo leeyahay ama xarun kireeysan.
- Si la mid ah waddooyinka daadgureynta, guryaha xaaladaha degdegga ah waxaa lagu doortaa iyadoo lagu saleenayo xaaladaha iyo inta uu la'egyahay degaanka ay dhibaataadu saameysey. Tirada dadka barakacay waxay sidoo kale tixgelin u tahay goobta iyo noocyada xarumaha loo isticmaali doono guryaha degdegga ah.
- Daadgureynta dadka deegaanka waxaa laga yaabaa in loo soo gudbiyo Xarun Kumeelgaar ah marka hore inta laga dhisayo guryaha gurmada degdegga ah.
- Si guud marki loo hadlo, guryaha gurmada degdegga ah oo ay dhistay degmada waxaa maamula Laanqayrta Cas. Adeegyada cuntada ee loogu talagalay dadka soo barakacay ee jooga hooyga gurmada degdegga ah ayaa waxaa isku duwi doona shaqaalaha maamulka hoyga.
- Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan waxa la keeno hoyga waxaa laga heli karaa Laanqayrta Cas ama Xafiiska Maaraynta Gurmada degdegga ah

9. Xayawaankeyga ma ila joogi karaa Hooyga Gurmada Degdegga ah?

- Xayawaanada looma oggola hoyga gurmada degdegga ah. Milkiilayaashu waa inay sameeyaan qorshe si ay u dejiyaan xayawaanadooda ama u yeeshaan saaxiib u daryeelo inta ay deganyihiin hoyga.
- Xayawaanada kaliya ee laga ogol yahay guryaha xaaladaha degdegga ah waa eeyaha adeega iyo fardaha-yaryar ee adeega sida lagu xadiday oo lagu qeexay Xeerka Mareekanka Naafada Mareekanka (ADA).https://www.ada.gov/service_animals_2010.htm
- Daadguraynta ballaaran ee tirada dadka badan iyo xayawaanada lagu barakiciyay, degmadu waxay dhisi doontaa hooyga gurmada degdegga ah ee xayawaanada.
- Hoyga gurmada degdegga ah ee xayawaanada lamid ma aha adeegga xayawaan haynta; Milkiilayaasha xayawaanada waxaa laga filayaa inay ka caawiyaan daryeelka xayawaankooda ee goobaha guryaha gurmada degdegga ah ee xayawaanada.
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxa laga filayo milkiilayaasha xayawaanada waxaa laga heli karaa Xannaanada Xoolaha Degmada iyo Xarunta Xakamaynta.

10. Sideen ku ogaanayaa marka ay nabadgelyo tahay in aan ku laabto gurigayga?

- Saraakiisha amniga dadweynaha ayaa dadka kala talin doona marka ay nabadgelyo u tahay in ay guryahooda ku soo noqdaan iyadoo isticmaalaya warbaahinta, NIXLE, iyo goobaha warbaahinta bulshada.
- Goobaha guryaha gurmada degdegga ah ayaa sidoo kale soo bandhigaya macluumaad si ay uga caawiyaan dadka degan inay fahmaan marka ay filan karaan inay nabadgelyo noqoto inay ku noqdaan guriga.
- Bogagga waaxda sida booliska, dabka iyo Xafiiska Maaraynta Degdegga ah ayaa wali sidookalesii wadi doonaan inay ku wargeliyaan muwaadiniin marka ay nabadgelyo tahay in lagu noqdo guriga.

Waaxda Booliska ee Anchorage

Facebook-ga <https://www.facebook.com/APDInfo>
Twitter-ka <https://twitter.com/APDInfo>
Bogga Degmada <http://www.muni.org/departments/police/pages/default.aspx>

Waaxda Dabka ee Anchorage

Facebook-ga <https://www.facebook.com/pages/The-Anchorage-Fire-Department>
Twitter-ka <https://twitter.com/afdinfo>
Bogga Degmada <http://www.muni.org/departments/fire/pages/default.aspx>

Xafiiska Maareynta Gurmada Degdegga ah

Facebook-ga <https://www.facebook.com/AnchorageOEM>
Twitter-ka https://twitter.com/Anchorage_OEM
Bogga Degmada <http://www.muni.org/departments/oem/pages/default.aspx>

Dadka deegaanka waa inay ugu diyaargaroobaan dhammaan xaaladaha degdegga ah ama masiibooyinka iyagoo:

□ **Samaynaya Sanduuq!**

- Samee sanduuqa guriga oo leh sahayda 7 ama maalmo ka badan IYO samee sanduuq yar oo gacan qabsi ah si aad u qaadatid haddii ay tahay inaad gurigaaga kaga baxdo si degdeg ah!
- Ku dar biyo, cunto, daawo, dhar, lacag caddaan ah, alaabta musqulaha, alaabta nadaafadda, alaabada daryeelka xayawaanka, iyo baahiyaha gaarka ah (qalabyada caawinta, cuntooyinka gaarka ah, iwm.).



□ **Yeelanaya qorshe!**

- Sidee ayaad rabtaa inaad kula xiriirto? Tallaabooyin noocee ayaad rabtaa inaa qaado?



□ **Ka warqabaya xaalada!**

- Furo Nixle si aad u hesho digniin iyo tilmaamo oo aad kuheleeso qoraal, iimayl, Facebook, ama Twitter oo ka socda amniga bulshada ee Anchorage. Udir Zip codekaada MOA 888777 ama ka furo internetka Nixle.com
- Dhegeyso, akhri, daawo, oo lasoco warbaahinta wararka deegaanka.



Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan samaynta qorshe, samaynta sanduuq gacan qabsi, iyo wargelinta waxaa laga heli karaa Xafiiska Maareynta Gurmada Degdegga ah.

Isku diyaarinta dabka-wayn...

Diyaar, Hagaaji, Soco!

□ **Diyaar! Ahoow dab-kadaal iyo diyaar!**

Qaad masuuliyada shakhsiga oo isdiyaari waqti dheer kahor khatarta dabka duurka si gurigaagu uu diyaar u ahaado haddii dab dhaco. Diyaari meel aad isku difaaci karto adigoo ka nadiifinaya khashinka gurigaaga. Isticmaal dhismaha dabka-u-adkaysta oo ku adkee gurigaaga cabbir dhismo dab-iska celiya. Iskugu duwo sahayda degdegga ah iyo alaabooyinka meel ammaan ah. Qorshee jidadka baxsashada oo hubi in dhammaan kuwa ku nool guriga dhexdiisa aay ogaadaan qorshaha ficilka.



□ **Hagaaji! Samee oo ilaali wacyigelinta Xaaladaha!**

Diyaarso alaabtaada xaaladda gargaarka degdegga ah. Kala soco wararkii ugu dambeeyay iyo macluumaadka ku saabsan dabka warbaahinta maxalliga ah, waaxda dab demiska ee deegaankaaga iyo ammaanka dadwaynaha.

□ **Soco! Ka fal-celi wakhti hore!**

Raac qorsha shakhsiyeedkaaga tallabada dabka-wayn. Sameynta sidan keliya ma taageerayso ammaankaaga, laakiin waxay u oggolaanaysaa dab-demiyeaasha in ay helaan khayraadka ugu fiican si ay ula dagaallamaan dabka.

<http://www.wildlandfirersg.org/Resident>